



2017-08-24

Waa caddaalad in khidmad sax ah laga bixiyo xannaanada carruurta

Inta lagu gudajiro 2017 wuxuu maamulka degmada Norrköping kontarool ku sameynayaa khidmadihii laga bixiyey xannaanada carruurta sannadkii 2015. Waxaannu isu fiirineynaa oo isbarbardhigeynaa dakhliyadii aad noo soo gudbisey 2015 iyo dakhliga canshuurta laga bixiyey oo aan ka helnay Hay'adda cashuuraha. Waxaana lagu salaynayaa dakhligii aad soo gudbisey bishii Maajo ee 2016. Khidmadda xannaanada carruurta waxaa lagu saleeyaa dakhliga bisha laga xisaabiyey. Dakhliga aannu Hay'adda cashuuraha ka helno ayaannu u qaybinnaa 12 bilood si aannu qiyaasta dakhliga bisha u helno.

Haddii dakhliyadii aad noo soo gudbisey uu ka **hooseeyey** dakhliga aan ka helnay Hay'adda cashuuraha, kolkaas **waxaad khidmad yar ka bixisay** ilmaha xannaanada kuu bilaabay 2015. Markaan dib isu barbardhigno khidmaddii aad bixisay iyo warbixinta dakhliga oo aan ka helno Hay'adda cashuuraha, waxaa noo muuqata in ay ahayd in aad bixiso khidmad intaas ka badan.

Waxaannu ku soo direynnaa warqad lacag-bixin oo dhan **0000 kr**.

Waxaadna haystaa 60 maalmood oo aad lacagtaas ku bixiso. Laakiin waxad u bixin kartaan qaybqayb ilaa laga gaadhayo maalinta ugu dambaysa bixinta, adiga oo isticmaalaya isla ocr-ka ku yaalla. Warqaddaas lacagta lagu bixinayana waxaa laguugu soo dirayaa boosto.

Lacag-bixinta noocaan ah uma isticmaalno habka Autogiro ama elektarooniga internet lagu soo diro.

Codsi ku saabsan dhammaystirka xogta saldhigga u ah warqadda lacag-bixinta?

Isticmaal imeylka etjanst.norrkoping.se/BU01 adigoo cadeynaaya inaad rabto xag dheeraad oo ku saabsan warqada warbixinta. Arintaada waxaa loo gudbinayaa gacanyare u qaabilsan eegistra arintada. Adeegga elektaroonigga ahi wuxu u baahanyey e-legitimation

Warqaddayda lacag-bixintu waa sax, balse mar qura ma wada bixin karo lacagta ku qoran, maxaan sameeyaa?

Kolkaa waxaad codsan kartaa in lacag-bixinta dib laguugu dhigo iyadoo lagu siinayo ugu badnaan 12 bilood oo aad ku bixiso oo ka bilaabanaysa taariikhda warqadda lacagbixinta. Inta lagu jiro waqtiga lagu dheereeyey waxaad u bixin kartaa qaybqayb ugu yaraan 100:- bil kasta, adiga oo isticmaalaya isla ocr bil kasta. Wakhtiga lagu

dheereeyey dhexdiisa. Hadaad rabto inaad cosato si lacagbixinta dib laguugu dhigo Istimaal amma gal iimeylka kamuunka oo ah etjanst.norrkoping.se/BU01. Adeeggu wuxu u baahanyey e-legitimation

Haddii aysan warqadda lacag-bixintu sax ahayn, sidee ayaan uga dacwoodaa?

Haddii aad diiddan tahay waxa ku qoran warqadda lacag-bixinta, waxaad noo soo direysaa dacwo qoraal ah. Kaddibna baaritaan ayaan sameyneynnaa, jawaabtana guriga ayaan kuugu soo direynnaa. Dacwadda u dir:

Norrköpings kommun
 Utbildningskontoret
 Avgiftskontrollen
 601 81 Norrköping

Ma soo gudbisay hadda warbixinta dakhligaaga ee wakhti xaadirkan?

Idinka oo ah kuwa leh mas'uuliyadda xanaanada, wuxu xil idinka saaranyahay in aad soo sheegtaan dakhliga saxda ah iyo xaaladda qoysnimo si ay khidmadda xannaanada carruurta ee qoyskiinnu sax u noqoto. Qiimaha khimadda xannaanada carruurta wuxu quseeyaa dadka keli keli u deggen iyo lammaana is qaba. Is qabitaanka waxa xagga khimadda lala simaa kuwa isla deggen ee kharashka qoysku isugu jiro, ha ka dhaxayso carruuri ama yaanay ka dhaxayne. Foomamka warbixinta dakhligu waxay ku jiraan bogga internetka ee degmada www.norrkoping.se, waxana loo oo dirayaa:

Norrköpings kommun
 Utbildningskontoret
 Placeringshandläggarna
 601 81 Norrköping

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan kontaroolka khidmadaha ka akhriso www.norrkoping.se
 Istimaal iimeylka etjanst.norrkoping.se/BU01.

Hadaad rabto inaad la xiriirto waaxda kontaroolida isticmaal iimeylkan etjanst.norrkoping.se/BU01. Arintaada waxaa loo gubinayaa gacanyare, kaasoo arintaada eegaya, waxeyna qaadaneynsaa mudo afar isbuucod ah.

Telefoonka waaxda waa 011-15 18 08. Xiliyada telefonka la wici karaana waa inta u dhaxeysa 10-12 maalmaha isniinta ilaa iyo jimcaha.

Linnea Lagnström
 Agaasime maamul